8

Xeerka Qoyska sida uu u quseeyo dumarka Soo galootiga ah, kuwa Qaxooyiga ah iyo kuwa aan Sharciga lahayn

SOM 008

XEERKA QOYSKA IYO DUMARKA DEGGAN ONTARIO

Dumarka oo dhan.
Hal Sharci oo Xeerka Qoyska ah.

Ogoow xuquuqdaada.

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Xeerka Qoyska sida uu u quseeyo dumarka Soo galootiga ah, kuwa Qaxooyiga ah iyo kuwa aan Sharciga lahayn

Buugan yar waxaa loogu tala galay in lagugu siiyo warbixin gaaban oo ku saabsan arrimaha khuseeyo sharciga. Xogtan ma lagu beedeli karo xogta gaarka ah iyo caawinaada qofka loo fidiyey oo sharciga ku saabsan. Haddii arrintaada ay khuseyso sharciga xeerka qoyska, raadso la talin sharci ah sida ugu dhaqsiyaha badan si xaqaada aad u dhacsato. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan sida aad u heli lahayd qareenka arrimaha xeerka qoyska, lagacna aad u siin lahayd, ka fiiriso buugeena yar oo ku magacaaban "sida aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska" oo ku qoran shabakadda www.onefamilylaw.ca.

Dumarka Kanada ku cusub marka guurkooda uu dhamaado waxay la kulmaan dhibaatooyin fara badan. Waxaad:

- ka wal-wali kartaa joogitaankaada waddanka Kanada
- ka wal-wali kartaa sida aad u noolaan lahayd haddii aad ka tagto saygaada bacdamaa uu ku soo wakiishay
- ka wal-wali kartaa in caruurta uu u celiyo waddankii aad ka soo tagteen adiga oo aan raali ka ahayn
- dhib kala kulmi kartaa in aad ka hesho masruufka caruurta haddii uu waddanka kaaga tago

Xeerka qoyska waxba kama quseeyo sharcigaada waddan ku jooga ah. Waad codsan kartaa in lagu siiyo xilka xannaanynta caruurta ama masruufkooda adiga oo aan ka cabsan sharcigaada waddan ku jooga ah noociisa.

Inkastoo aad leedahay xuquuqda dumarka oo idil, haddaana kol haddii aadan lahayn sharciga waddanka lagu joogo, saraakiisha socdaalka way ku dhoofin karaan haddii ay ku ogaadaan. Waddanka Kanada in aad ku noolaato waxay u baahantahay sharci. Si aad u bad-baadiso nafsadaada iyo tan caruurtaadaba waa in aad xuquuqdaada ogaata.

1. Arrimaha Socdaalka ku saabsan

Haddii uu guurgiina dhamaado, joogitaankaada waddanka Kanada waxay ku xirantahay aqoonsiga aad heysato.

Joogitaan Rasmi ah

Haddii aad aqoonsi **joogitaan rasmi ah** haysato ama **sharciga waddan ku jooga ah** aad haysato oo uu xiriirkiina guurka dhamaado, ma lumineysid sharciga aad waddanka Kanada ku joogtid, waddankana lagaama saari karo xitaa haddii uu sayga wakiil ka ahaa marka aad imaaneysay waddanka Kanada. Wakiilka waxaa saaran xil ah in uu ku masruufo muddo 3 sano ah, ama wada jooga ama kala taga. Haddii ruuxa wakiilka kaa ah uusan bixin karin ama diido masruufkaada, waxaad codsan kartaa lagacta cayrta ah si aad u noolaato.

Haddii wakiil lagaa noqday adiga oo gudaha waddanka Kanada jooga, xirriirkiina guurka uu dhamaaday *inta aan* codsigaada joogitaanka rasmiga ah la aqbalin, waxaad codsan kartaa in habka **Humanitarian and Compassionate (H & C)** lagugu aqbalo in aad waddanka sii joogto. Inta aad saygaada isqabteen haddii lagugu xadgudbay, codsigaada ku dar arrintan oo la socodsii saraakiisha waaxda socdaalka. Si uu kuugu xirgalo codsigaada joogitaanka ee H & C ga ah, waa in aad muujisaa in aad waddanka si fiican ula qabsatay iyo in aad is nooleen kartid. Dumarka lacagta cayrta ah ku nool way ku adkaaneysaa in ay ku guuleystaan codsigooda. Waa in aad ruux qareen ah kala tashataa codsigaada H & C ga ah.

Codsiga H & C ga kaama celinaayo in waddanka lagaa saaro. Saraakiisha waaxda socdaalka way ku soo xiri karaan, kaana dhoofin karaan waddanka inta aad sugeysid jawaabta codsigaada ku saabsan H & C ga.

Dadka Qaxootiga ah iyo kuwa u Baahan in la Amaan Geliyo

Waxaa laga yaabaa in aad waddanka Kanada ku joogtid qaxootinimo ama aad tahay ruux u baahan in la amaan geliyo. Haddii laguu aqoonsado qaxooti Run ah ama qof u baahan in la amaan geliyo, lagaama saari karo Kanada xitaa haddii uu guurkaada dhamaado.

Haddii codsigaada uu ku lifaaqnaa midka saygaada, xiriirkiinana uu idlaaday inta aan codsigiina degganaashaha waddanka la eegin, gooni waad ula bixi kartaa failkaada codsiga joogitaanka ku aadan. Haddii uu kugu xadgudbay saygaada, xogwarranka xadgudubkaada waad ku dari kartaa warbixinta codsigaada, waxaadna codsan kartaa in arrintan darted tixgelin iyo nabadgelyo lagugu siiyo. Si aad ugu guuleysato codsiga noocan ah waa in aad muujisaa in aad halis ku galeysid **waddankaadii hooyo** iyo in dowladdaas aysan ku amaan gelin karin ama wax ka qaban karin xadgudubka lagugu sameeyo.

Haddii codsigaada qaxootinimada la diido, waxaad codsan kartaa in laguu tixgeliyo midka H & C ga (fiiri qeybta kore). Waxaad kaloo codsan kartaa in marka hore si fiican loo qeymeeyo dhibaatada ku soo gaari karto haddii lagu dhoofiyo **(pre-removal risk assessment (PRRA)**. Habkan wuxuu farayaa in saraakiisha socdaalka ay tixgeliyaan halis haddii ay ka imaan karto waddanka laguu dhoofinaayo.

Sharci La'aan

Waxaa laga yaabaa in aad waddanka sharci la'aan ku joogtid. Sababtu waxay noqon kartaa sharcigii dalxiisnimada ama ardaynimada oo aad ku timid oo kaa dhacay amaba aad waddanka si sharci darro ah ku soo gashay. Si aad codsiga H & C ga u sameysato waa in aad ruux qareen ah si deg deg ah ula tashataa. Hadba sida uu xaalkaada yahay, waxaa kaloo kuu furan fursado kale oo ku aadan joogitaankaada. Inkastoo aad leedahay xuquuqda dumarka oo idil, haddaana kol haddii aadan lahayn sharciga waddanka lagu joogo, saraakiisha socdaalka way ku dhoofin karaan haddii ay ku ogaadaan.

2. Ku xadgudubka Dumarka

Haddii horey laguugu soo xadgudbay, saraakiisha socdaalka kolka ay codsigaada eegayaan waa in ay tixgeliyaan arrintan ku qabsatay.

Kanada gudaheeda waa ka mamnuuc in qof dumar ah lagu xadgudbo. Haddii boliiska ay dareemaan in saygaada uu ku dilay, dambi ayey ku oogayaan. Way eedeynayaan xitaa haddii adiga aadan raali ka ahayn. Haddii boliiska ay dareemaan in adiga aad dil u geysatay, sidaas oo kale dambi ayey kugu oogayaan.

Haddii dambiga lagu xukumo saygaada, waxaa halis gali kara sharciga joogitaankiisa, waxaana dhici kara in waddanka laga saaro. Xitaa haddii aanan dambi lagugu helin, laakiin boliiska, xeer ilaaliyaha ama cid kale ay ogaato in waddanka aad sharci darro ku joogtid, waxay la socodsiin karaan saraakiisha socdaalka. Haddii ay saa dhacdo waa lagu xirayaa, waana lagu dhoofinayaa. Haddii aad dambi gasho, si dhaqsiyo ah ula xiriir qareen sharciyada socdaalka yaqaano.

3. Arrimaha Xeerka Qoyska ku saabsan

Marka sharciga xeerka qoyska la fiiriyo, dumarka soogalootiga ah, kuwa qaxootiga ah iyo kuwa aan sharci waddanka ku joogin waxay leeyihii xuquuqda iyo waajibaadka ay dumarka Kanada ku dhashay leeyihiin oo kale. Waxaad codsan kartaa in lagu siiyo xannaanynta, ka warqabka, masruufka caruurta iyo kan dumarka la siiyaba. Waad weydiisan kartaa maxkamadda in qeybtaada xantida guriga lagu siiyo marka la kala tago.

Haddii adiga ama saygaada aad Kanada timideyn idinka oo ka yimid waddan kale, si uu idiin qabto sharciga xeerka qoyska way dhib badnaaneysaa, khaasatan haddii midkiin uu go'aansado in uu waddankiisa ku laabto. Waxyaabaha dhici karao waxaa ka mid ah:

a) La guuridda caruurta

Go'aanka ugu dhibta badan ee had iyo jeer soo moq-noqda wuxuu yahay kolka uu waalidka caruurta mas'uulka ka ah uu go'aansado in uu ka guuro magaalada ay caruurta deggantahay una guuro gobol kale ama sita xitaa mar mar dhacda waddan kale in loo raro. Waaxaad raboon kartaa in aad u guurto halka ay u badan yihiin reerahaada si ay kuu caawiyaan ama meel fursad shaqo leh. Arrintan guuridda ah dhib weyn ayey u keeni kartaa waalidka kale oo caruurta dhalay si uu uga warqabo caruurtiisa. Midda kale, safarka wuxuu waalidka kale uga baahanyahay dhaqaale hadba inta ay meesha u jirto.

Go'aan kasta oo maxkamadda la soo gudboonaado oo ku aadan arrin caruur quseysa, ha la guuro iyo yaan la guurin, waxay had iyo jeer maxkamadda muhimadda siineysaa **meesha ay danta caruurta ku jirto**. Haddii laguu ogolaado in aad la guurto caruurta, maxkamadda heshiiskii ku aadanaa ka warqabidda caruurta oo uu lahaa waalidka kale wax bay ka beddeleysaa. Waxaa waalidkan loo ogolaanayaa in uu waqti dheer la qaato caruurtiisa bacdamaa uu soo safray ama waxaa dhici kara in lacagta masruufka lagaa yareeyo bacdamaa uu waalidkan kharash badan ku soo bixiyo safarka ah soo booqashada caruurta.

b) La dhoofidda caruurta

Sida ay u badantahay, waalid keli ah caruur ma ula dhoofi karo dibadda Kanada asaga oo aanan waalidka kale ee caruurta dhalay fasax ka wadan. Haddii ay noqoto in aad Kanada kala dhoofto caruurta horey u qaado warqadda tilmaameyso in mas'uuliyadda caruurta ay adiga ku saarantahay iyo in aad ogolaasho waalidka kale ka heysato. Warqadda waa in aad ka soo shabadeysaa ruux qareen ah si ay sharci u noqoto. Kolka aad xuduuda mareysid, waa in aad ku talogashaa in ilaalada xuduudka fadhiyo ay ku wareysan karaan caddeyn ku aadan in waalidka caruurta dhalay uu ka warqabo safarkan, raalina ka yahay in caruurta ay dhoofaan.

c) Afduubka Caruurta

Mararka qaar waxaa dhacda, waalidiinta mid ka mid ah in uu caruurta la baxsado oo uu waddanka Kanada ka bixiyo asaga oo aan waalidka kale fasax ka wadan. Waa arrin culus, mar haddii caruurta waddanka Kanada laga saaro si lagu soo celiyo way dhib badan tahay. Arrintan waxaa lagu magacaabaa **afduub ilmo**. In ilmo la afduubo waa dambi aad u culus Kanada gudaheeda.

In caruurtaada ay sharci darro Kanada kaga baxaan si loo hubiyo aad bay u adagtahay, laakiin waxaa jira wax yaabo aad sameyn kartid si ay caruurtaada u bad baado. Marka hore hubi in warqadda heshiiska ay ku caddahay xilka xannaanayntaada

- ay u qoran tahay si fasiix ah oo tifa tiran
- ay qeexeyso in caruurta aysan ka dhoofi karin waddanka Kanada.

Warqadda maxkamadda waxaa kaloo lagu qeexi karaa in baasaboorka caruurta ama kan waalidka kale aad adiga ama maxkamadda ay gacanta ku hayso.

Sharciga keli ah ee caruurtaada kuu soo celin kara marka waddanka laga dhoofiyo wuxuu yahay midka "*Hague Convention on the Civil Aspects of International Child Abduction*". Waa heshiis caalami ah oo ay kala saxiixdeen 75 waddan. Waddamada heshiiskan wada gaaray waxay ku heshiiyen in ay wada shaqeeyaan si ay u raadiyaan una soo masaafuriyaan caruurta si sharci darro ah looga soo dhoofiyey waddamadooda.

Haddii caruurtaada loo dhoofiyo waddan aan heshiiskan saxiixin, way dhib badnaaneysaa sida caruurtaada waddanka Kanada loogu soo celiyo. Haddii ay saa dhacdo, waad ka dacwoon kartaa arrintan adoo raacay sharciga u degsan waddanka caruurta la geeyey. Waxaad isku dayi kartaa oo kale in aad la xaajooto afduubaha iyo reerkiisa.

d) Sida lagacta masruufka looga soo qaado ruux ku nool dibadda gobolka Ontario

Gobolkan Ontario, xukunka bixinta masruufka caruurta iyo kan dumarka waxaa fulinaayo hay'ad dowladda dhexe ay u xilsaartay oo la yiraahdo **Xafiiska Waajibaadka Qoyska [Family Responsibility Office** (FRO)**]**. Xafiiska FRO wuxuu kaa caawini karaa in uu bixiyaha (ruuxa lagacta bixiyo) ka soo qaado lacagta masruufka haddii uu ku noolyahay meel kasta oo ka mid ah waddanka Kanada ama Mareykanka iyo waddamo kale. Taasi waxaa suuro gal ka dhigeyso heshiisyada ka dhaxeeyo gobollada Kanada oo idil iyo Mareykankaba oo u suuro gelinaayo in xafiiska FRO ka soo uruuriyo lacagta xitaa haddii xadka laga gudbo.

Haddii waalidka bixiyaha ah uu ku noolyahay waddan aan heshiis la lahayn gobolka Ontario, xafiiska FRO ma jirto wax uu ka qaban karo xoojinta xukunkan. Sida kali ah oo wax looga qaban karo arrintan waxay tahay in la tiigsado sharciga waddankaas u degsan.

Haddii aad tahay qof dumar ah oo ku hadasho luqadda fransiiska oo ku nool gobolka Ontario, waxaad xaq u leedahay in laguugu adeego luqadda Fransiiska kolka ay maxkamadda xallineyso arrimaha xeerka qoyskaada. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada, kala xiriir ruux qareen ah, xarumaha adeega arrimaha sharciga khuseeya, ama khadka taakuleynta Femaide 1-877-336-2433, TTY 1-866-860-7082.

Xogwarran dheeraad ah oo ku saabsan sida aad ku heli lahayd adeega luqadda Fransiiska ah ka fiiri shabakadda www.onefamilylaw.ca ama www.undroitdefamille.ca.

Mawduucyada Xeerka Qoyska oo diyaarka ah:*

1. Siyaabaha kale ee lagu Xallin karo Khilaafaadka iyo Xeerka Qoyska wuxu ka qabo (SOM 001)
2. Badbaadada Caruurta iyo Xeerka Qoyska (SOM 002)
3. Masruufka Caruurta (SOM 003)
4. Xeerka qoyska iyo kan Dambiyada (SOM 004)
5. Xannaanaynta iyo ka Warqabka Caruurta (SOM 005)
6. Heshiisyada Qoyska (SOM 006)
7. Gar-qaadida Xeerka Qoyska (SOM 007)
8. **Xeerka Qoyska sida uu u quseeyo dumarka Soo galootiga ah, kuwa Qaxooyiga ah iyo kuwa aan Sharciga lahayn (SOM 008)**
9. Sidii aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska (SOM 009)
10. Sharciga Xeerka Qoyska sida uu u Qaybiyo Hantida reerka (SOM 010)
11. Guurka iyo furidda (SOM 011)
12. Masruufka Sayga (SOM 012)

** Buugan waxaa la heli karaa asagoo noocyo kale ah ama luqado kale ku qoran. Fadlan eeg shabakadda www.onefamilylaw.ca si aad u hesho warbixin dheeraad ah. Websaaydkeena waxaad kaloo ka heleysaa buugag badan oo kaa caawinaayo sida aad u aqoonsan lahayd xaqaada ku qoran sharciga xeerka qoyska.*

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Funded by: / Financé par :
Ontario

Xogwarranka ku qoran qoraaladan waa aragtida hay'adda FLEW sidaa darted dowladda Gobolka mas'uul kama ahan nuxurka qoraaladan.